

**OGAYSIIS KULAN GAAR AH & AGENDAHA
EE
GOLAHA GUUD EE BULSHADA CEDAR (CEDAR RIVERSIDE
COMMUNITY COUNCIL)**

Taariikhda Ogaysiiska: Sebtember 23, 2020

Sida ay codsatay bulshadu, Madaxweynaha Guddiga Maamulka ee Cedar Riverside Community Council iyada oo loo marayo ogeysiiskan wuxuu ku baaqayaa kulan gaar ah oo la qabanayo isla isla taariikhda iyo waqtiga Kulankeeda Guddiga ee joogtada ahaa. Iyadoo la raacayo Minn. Stat. 317A oo ku saabsan shirarka gaarka ah, ogeysiiskani wuxuu ka kooban yahay ujeedada kulanka iyo ajandaha gaarka ah, ee sharci ahaan ay tahay in lagu dejijo ogaysiiskan.

Macluumaadka Kulanka

Taariikhda:	Arbaco, Oktoobar 7, 2020
Waqtiga:	6:00PM – 7:30PM
Goobta:	Kulan kambiyutarka la isku arkayo oo loo marayo Zoom
Maamulaha:	Kulankan waxaa la qabanayaa iyga oo iyadoo lala kaashanayo League of Women Voters Minneapolis waxaana kulanka hogaamin doona oo taageeraya mutadawiciinta iyo shaqaalahooda.

Ujeedada & Ajandaha Kulan

Kulankan qaaska ah waxaa loo qabanayaa ujeedada gaarka ah ee dhageysiga xubnaha xaqaa u leh inay codeeyaan ee Golaha Bulshada ee Cedar Riverside wixii ku saabsan su'aalahoooda iyo walaacooda iyo in la siiyo fursad ay xubnaha codbixintu la fariistaan hoggaanka CRCC ee la xiriira dhacdooyinkii mudho dhowayd dhacay. Dhageysigan iyo macluumaadku waa ujeedada kaliya ee kulanka gaarka ah. Ma jiro howl ama codbixin kale oo lagu qaban doono kulanka.

Isiiwaangelinta Shirka

CRCC waxay qabataa shirar kombiyurka la isku arkayo oo la adeegsanayo Zoom. Horay in la isu sii diiwaangeliyo ayaa loo baahan yahay. Dadka isdiiliwaangaliyay ayaa awoodi doona inay soo galaan kulanka. Kulankani, sida shirarkeena caadiga ah wuxuu u furanyahay dadweynaha. Si kastaba ha noqotee, xubnaha u qalma in ay codeeyaan waxaa la siin doonaa diiwaangelin mudnaanta leh maadaama kulanka kombiyurka lagu shirayaa uu xaddidayo tirada dadka la ogol yahay in ay kasoo qaybgalaan kulankiiba.

Haddii ay dhacdo in ay diiwaangelintu ay ka badnaato kuraasta la heli karo, CRCC waxay jadwal u samayn doontaa taariikh dheeri ah oo kulan gaar ah isla ujeeddadaas oo kale si ay u qaabisho dhammaan xubnaha codbixinta u-qalma ee doonaya inay ka soo qaybgalaan.

Sida La Isu Diiwaangaliyo

- Si aad isugu diiwaan geliso taleefanka fadlan soo wac CRCC 612.338.5578. Fadlan ku reeb farriin, ay ka mid tahay luqadda aad doorbideyso marka lagugu soo celiyo, magaca (fadlan noo isbeeli), lambarka taleefanka, cinwaanka emailka, iyo wixii su'aalo ah ee aad qabto.
- Si aad isuga diiwaangeliso khadka internetka soo booqo <https://tinyurl.com/crcclistens>